



GURMAD
CONSULTING COMPANY

Mashaaricda la maalgalinayo

Welcome To Our Company



www.gurmadconsulting.com



Mohamed Abdilahi Dahir
CEO/Founder

Shirkada

Gurmad consulting waa shirkad ka shaqaysa la talinta iyo horumarinta ganacsatada iyo ganacsiyada, shirkadu waxaanu ganacsata u duyaarinay inkabadan 12 adeeg aanu u qabano ganacsatada oo ay ka mid yihiiin strategic planning, marketing, sales, digital marketing, market research, feasibility studies, branding, copywriting, auditing & accounting, human resource management, business trainings, business systems development, website and application development. iyo sidoo kale inaanu ganacsiga wixii mushkilad gaar ah ee haysata aanu la xalino fikiro cusubna u samayno.

Himilada iyo yoolka

Himilada

Himiladayada fogi waa in aanu noqono shirkada ugu horaysa iyo hormuudka shirkadaha ka shaqeeya la talinta iyo horumarinta ganacsatada iyo ganacsiyada qaarada Africa, siiba Bariga Africa iyo dhulka Somalidu degto. Hadafkayga ugu wayni waa tayeeeynta iyo wanaajinta qaab ganacsiyedka iyo wax soo saarka dalka anagoo aaminsan in uu ganacsigu yahay waxa badali kara dhaqaalaha dad iyo dalba loona baahanyahay in la kobciyo si loo dabar jaro dhaqaala xumaanta iyo shaqo la'aanta baahsan

Yoolka

Yoolkayga iyo hanaanka aanu ku shaqaynaa waa u diyaarinta adeegyo ku haboon macaamiishayda kuwaas oo u horseedi kara horumar iyo koboc dakhli iyo mid ganacsiba, waxaanu mar walba xooga saarnaa inaanu sii saadaalino kana warhayno isbadalada aduunka ka dhacaya iyo saamayntooda togan iyo ta taban ee ay ku yeelan karaan ganacsiyadeena anagoo u sii diyaarinayna qaabka ay uga faa'idaysan lahaayeen ama uga gaashaaman lahaayeen si ganacsiyadoodu u bulaalaan, waxaanu sidoo kale xooga saarnaa inaanu soo kordhino fikrado cusub iyo qaab qanacsiyedyo cusub si loo furo albaabo iyo ilo dhaqaale loogana faa'idaysto fursadaha suuqa yaala. astaantayadu waa aamiinad, adeeg hufan, firficooni iyo waji furnaan iyo sidoo kale halabuurnimo.

Qaybaha shirkada

• Adeegyada horumarinta ganacsiyada

inkabadan 12 adeeg aanu u qabano ganacsatada oo ay ka mid yihin strategic planning, marketing, sales, digital marketing, market research, feasibility studies, branding, copywriting, auditing & accounting, human resource management, business trainings, business systems development, website and application development. iyo sidoo kale inaanu ganacsiga wixii mushkilad gaar ah ee haysata aanu la xalino fikiro cusubna u samayn

• Curinta iyo Mashaariicd

Qaybta labaad oo ah qaybta curinta iyo mashaariicda taas oo ka shaqaysa in suuqa wixii gaps ka jira la buuxiyo, fikrado cusubna lagu soo kordhiyo cid kasta oo fikir hayaana ay noola iman karto si aanu uga caawino hirgalinta fikirkiisaas.

• Adeegyada ganacsi ee diyaarsan

Qaybta sadexaad oo ah qaybta resources oo uu ganacsadahu ka heli karo templates diyaarsan haday noqdaan kuwa qorshe iyo dhamaan Dukkumantiyada ganacsiga oo diyaarsan awoodna u uleeyahay inuu badbadasho ganacsadahu io sidoo kale buugaag, warbixino iwm

Ganacsiyada



Shaqohub

Shaqohub waa shirkad ka shaqaysa baahinta iyo shaacinta shaqooyinka banaan sidoo kalena ka shaqaysa tababarida, carbinta iyo shaqaalaysiinta dhalinyarta kasoo qalinbadsha jaamacadaa, kuna xidha fursadaha shaqo carbin ee ganacsiyada, hayadaha caalamigabah iyo Kuwa dawliga ahba ka banaan



Lacaglinks

Waa shirkad ka shaqaysa suuqqaynta iyo iibka agabka iyo adeegyada ganacsiyada iyadoo la adeegsanayo qaab casri ah oo online ah sidoo kalena cid walbaa ay ka qayb qaadan karto cid walbaana suuqqayn karto agabka iyo adeegyada ganacsiyada ku jira madashan iyagoo la siin doono link ama lifaaq cid kasta oo lifaaqooda soo raacdana ay ku heli doonaan khidmaad



Rasamaal Investments

Waa shirkad ka shaqaysa maalgashiga ganacsiyada iyo mashaariicda iyadoo isku xidhaysa qofka lacagta haysta iyo qofka fikrada, ganacsiga ama mashruuca haya sidoo kalena waa madal aad ka heli doontid xili kasta fursad maalagashi, sidoo kale shirkadu waxay ka shaqayn doontaa kala iibinta saamiyada shirkadaha iyo sidoo kale kala iibsiga ganacsiyada.



Ilayeelo

Waa shirkad aad ku soo bandhigi karto wax kasta oo aad u baahanatay hase ahaatee aanad awoodin inaad kaligaa iibsato, hadii ay noqoto xafiis, ganacsi, gaadhi iyo hanti kasta oo lagula qaybsan karo una baahantahay cid lacagteeda kula guusha.



Online Suuq
Hormuudka Suuqa Online ka ah

Online suuq

waa madal aad ka heli doontid dhamaan products ka digitalka ah kaas oo aad si dhib yar ugala soo degi kartid sidoo kalena aad ku dhex iibin kartid hadii aad hayso



SOMGIGS
FIND REAL EXPERTS

Somgigs

waa madal aad ka heli doontid dad xirfad u leh oo si madax banaan kuula qabta shaqooyinka aad rabto.



MURUQMAAL
HOME FOR TECHNICIANS

Muruqmaal

waa madal aad ka heli doontid dhamaan farsamoyaqaanada aad u baahantahay



likari
your online kitchen

likari

waa madal aad ka heli doontid madbakhyo online ah oo kala duwan oo aad ka dalban karto cuntada aad rabto, sidoo kale aad ka samaysan karto madbakh cunto laga soo dalban karo.



Tarjumo

waa madal aad ka heli doontid dhamaan adeegyada tarjumaada qoraalada, muuqaalada, iyo buugaagta iyo sidoo kale tafatirida qoraalada.



Iihagaaji

waa madal aad ka heli doontid qof electronicskaaga sida mobilka, computerka, AC ga, talaagada, qaslaada iwm kuu hagaajiya isagoo goobtaada kuugu imanaya



Iibsame

waa madal aad ka heli doontid dhamaan macradada iyo gawaadhida iibka ah sidoo kale waxaad ka heli doontaa gawaadhida mustacmalka ah iyo spare parts ka oo dhan.



Nadiifiye

waa shirkad ka shaqayn doonta nadiifinta taangiyada biyaha iyo barkadaha, tuubooyinka, iyo sidoo kale booyadaha



Uqaad

waa shirkad ka shaqayn doonta u qaadista alaabaha yaryar ee qoysasku isku soo dhiibaan ee inta badan lala sugo qof baxaya oo isagana culays ku noqota inta badan



Afbarad

waa madal caruurta bari doonta afka soomaliga qaab madadaalo iyo waxbarasho iskugu jirta si waafaqsan diinta islaamka sidoo kalena soo saari doonta agab ay caruurtu ku ciyaraan oo waxna ku bartaan.



Ilaaliye

waa shirkad ka shaqayn doonta ilaalinta iyo ka hortagida weerarada onlineka ah sidoo kalena soo saari doonta dad xirfad u leh aqoontan



Kayd Storage

waa shirkad ka shaqayn doonta haynta iyo kaydinta alaabaha. shirkadani waxay macaamiisha u saamixi doontaa in ay ka raystaan sidoo kalena ay ka faa'idaystaan space kii ay alaabahu ka qaadan jireen.



Sahal cash

waa shirkad kuu sahlaysa inaad si dhib yar lacagaha online ka laga shaqaysto aad u hesho



imdaad Marketing

waa shirkad ka shaqaysa suuqgaynta casriga iyadoo beegsanaysa wadamada carabta.



Xaqraadiye

waa shirkad ka shaqaysa xaq u raadinta dhibanaayasha cafimaad sidoo kale ka shaqayn doonta la xisaabtanka adeegayaasha cafimaad



Somva

waa shirkad kaa caawinaysa ina laguu qabto shaqooyinka aad gacanyaraha uga baahantay si waqt badan aanu kaaga lumin shaqooyinka yaryar



KAAFTOON
MODERN FARM

Kaaftoon

waa shirkad ka shaqayn doonto kobcinta iyo horumarinta wax soo saarka dalka si loo gaadho isku filnaan iyo ka kaaftoomida quutul daruuriga la inoo soo dajiyo



HAGBAD ONLINE
MONEY POOL PLATFORM

Hagbad Online

waa shirkad ka shaqayn doonta ama casriyeeyn doonta adeegii hagbada sidoo kalena aad malinkasta iyo xili kasta aad ka heli kartid hagabd bilow ah



Midabsame
Modern printing company

Midabsame

waa shirkad daabacaad taas oo kuu daabici doonta dhamaan waxyaabaha aad u baahantahay si online ah iyadoo laguugu keeni doono goobta aad joogto



HUUDHAYDH
MARKETPLACE

Huudhaydh

waa madal aad ka heli doontid dharka huudhaydhka iyadoo laguugu keeni doono goobta aad joogto.



High Class

Waa shirkad ka shaqaysa timo jarista iyadoo oo casri ah iyada oo loogu adeegi doono macmiilka gurigiisa iyo goobta uu jecelyahay ama joogo.



Hala Taxi

waa shirkad ka shaqayn doonta ama bixin doonta adeega takaasida sidoo kalena ka shaqayn doonta in ay beegsato meelaha suuqa ka banaan



Somfatwa

waa madal aad ka heli doontid dhamaan suaalaha diiniga ah ee aad qabto jawaabahoodii oo af soomaali ah anagoo soo uruurin doona dhamaan fatwooyinkii sheekhyada soomalida sidoo kalena soo tarjumi doonta fatwooyinka luuqada carabiga



Widhwidh

waa shirkad ka shaqayn doonta maydhista gawaadhida taas oo adeegan casriyeen doonta iyadoo laguugu maydhi doono qaab heer caalami ah iya sidoo kale goobta iyo xiliga aad dalbato.



Perfect Fit

waa shirkad ka shaqayn doonta smaynta suitska iyadoo dalka dabadiisa lagaaga soo samayn doono suits tayo leh qiyaastaada ah oo qiimo wanaagsan.



Hoyga Buugta

waa madal aanu ugu talo galnay in laga helo dhamaan buugta digitalka ah kuwaas oo qofku ku heli karo si sahlan sidoo kalena dhamaan qoraayaasha loo ilaalin doono buugta digitalka ah kaas oo aan lala dagi karin lana sawiran karin



Bunyaan Construction

waa shirkad dhisme taas oo suuqa ku soo kordhin doonta qaab dhismeed cusub, fudud sidoo kalena waqtii yar qaadanaya, cid kastaana awoodi karto qiimahiisa.



Somsurvey

waa shirkad ka shaqayn doonta xog uruurinta iyadoo aanu isku xidhi doono ganacsiyada, haayadaha, shakhsiyadka iyo dadka ay u baahanyihii in ay xog ka helaan iyadoo dadka ka qayb qaadanayaana abaalmarin lacageed heli doonaan

Rarsame



waa shirkad ka shaqaysa adeeg rarista guryaha iyo xafiisyada iyadoo kuu qabanaysa dhamaan adeegyada rarka haday noqoto furfurka, qaadista, ilaalinta iyo xidhxidhka alaabta gurigaaga ama xafiiskaaga

Sombroker



waa shirkad ka shaqaysa kala iibsiga hantida ma guurda ah sida dhulka, guryaha, beeraha iwm

Xaraash



waa shirkad ka shaqaysa baahinta iyo suuqqaynta alaabha celiska ah iyo sidoo kale kuwa xaraashka ah.

Ilasooogaadh



waa shirkad ka shaqaysa adeega alaab qaadista sida cuntooyinka bisil iyo kuwa qaydhiinba, qalabka electronicska iyo wax kasta oo loo baahanyahay in la qaado.



Craftsuuq

waa madal online ah oo lagu soo bandhigi doono dhamaan waxyaabaha gacanta lagu sameeyo dalka dhexdiisa ee dadka farshaxanka iyo farsamoyaqaanki ay sameeyaan.



Layliye

waa madal aad ka heli karto dhamaan tababarada ku baxa afsoomaliga ee onlineka ku jira taas oo xili kasta iyo goob kasta oo aad joogtid aad heli kartid



Tysiir

waa madal aanu ugu talogalnay inay ku jiraan dhamaan ganacsiyada soomalida taas oo ka dhigi doonta suuqa online ka ah ee ugu wayn gayiga Somalida



Gurmad Consulting

waa shirkad ka shaqaysa la talint, kobcinta, iyo horumarinta ganacsatda iyo ganacsiyada.

In ka badan 40 ganaci oo kale ayaa kaydka Inoogu ku jira.

Nagu soo biir

Sida aad aragtaan himiladayada iyo yoolkayguba waa mid fog oo wax badan bulshada ku soo kordhin doona hadii Alle idmo maantana waxaad nagala qayb qaadan kartaa in aanu suuqa isbedal la taaban karo aanu ku samayno inshallah. waxaad maanta maalgashan kartaa dhamaan shirkadahan kana qayb qaadan kartaa geedi socodkan bilowga ah.

Contact Us

Phone

+252636676050

Website

www.gurmadiconsulting.com

Email

info@gurmadiconsulting.com

Address

*Third floor, Burj Oomaar,
Downtown, Hargeisa.*